La-taliyeyaasha ADIS way ku dhagaysan doonaan waxayna kaala hadli doonaan wax ku saabsan:

- Arimahaaga iyo dareenadaada,
- Taageerada iyo caawimaadda aad heli karto.
- Meel-u-dirid adeegyada kale oo wax caawin kara.

Turjumaano ayaa la heli karaa kuwaas oo lacag la'aan ah.

ADIS waxaa u shaqeeya la-taliyeyaal khibrad leh, daryeel leh iyo wax-taageerid, waxayna ku siinayaan adeegyo ballaaran oo ay ku jiraan:

- Talo-siinta Taleefanka-ku-salaysan ee khamriga iyo daroogada.
- Mac luumaad ku saabsan khamriga iyo daroogadu iyo jidhkaaga.
- Mac luumaad ku saabsan adeegyada la-tacaalidda khamriga iyo daroogadu iyo caawimaad daaweyn.

Fadlan wac haddii ADIS haddii aad doonayso macluumaad iyo taageero.

ADIS – 9442 5000 ama **1800 198 024** taleefan lacag la'aan ah soo wacayaassha tuulooyinka

Email: adis@health.wa.gov.au

Web: www.dao.health.wa.gov.au

Mail: ADIS, PO Box 126, Mt Lawley, WA 6929

Fax: 9442 5020

Adeegga turjumaanka Afka iyo Qoraalka 131450

Adeegga Wada-xiriirinta Qaran 133677

(kuwa maqalku iyo hadalku ku adag yahay).

Government of **Western Australia**
Drug and Alcohol Office

ADEEGGA MACLUUMAADKA Khamriga Iyo Daroogada Ee

ALCOHOL AND DRUG INFORMATION SERVICE (ADIS)

Miyaad ka walwalsan tahay khamriga ama daroogooyinka?

Dhib miyey kugu hayaan?

Ma u baahan tahay macluumaad ama taageero?

Taleefankan u dir
9442 5000 ama 1800 198 024
soo wacayaassha tuulooyinka

Xusuusnow, markii aad ka fakartid khamriga iyo daroogooyinka, Waxaa jira noocyo kala duwan oo daroogooyin ah sida cannabis, heroin, amphetamines (xawaare, baraf), daawooyinka dhaqatarku qoro ama farmashiga, qaadka, tubaakada iyo kuwo kale oo dhibaato keeni kara.

Halkan waxaa ah su;aalaha qaarkood oo kugu caawin kara inaad goáansato:

- Miyaad doonaysaa inaad hesho qoyska iyo saaxiibada oo mar kasta ka cabanaya inaad qabto khamriga ama daroogada?
- Miyaad qaadataa khamriga ama daroogada markii kowaad subaxdii?
- Miyaad qaadataa khamriga ama daroogada si ay kuu firfircooniyaan maalintaas?
- Adiga ama cid kale miyey ku dhaawacantay sababtoo ah khamriga ama daroogada?
- Miyaad ka qarisaa khamriga ama daroogada qoyska ama saaxiibada, sababtoo ah waad ka xishoonaysaa, qajilaysaa ama cabsanaysaa?
- Miyaa qaadashada khamriga ama daroogada ay saamaysaa qaybaha kale ee noloshaada, tusaale, xiriirka qoyska, shaqada, saaxiibtinimada, maaliyadda, amase caafimaadka?
- Miyaad marna kaa go'day lacagta waxyaalaha aad u baahatay, sida cuntada ama bixinta biilasha, sababtoo ah lacagtii waxaad ku isticmaashay khamriga ama daroogada?
- Miyey ku haystaan dhibaatooyin sharciyeed ama mushkilad kaa haysata boliiska sababtoo ah khamriga ama daroogada, tusaale adoo cabsan baabuur-wadid, akhlaaq xumo ama eedayn isticmaalka daroogada?

Haddii aad ku jawaabtey haa mid ka mid ah suáalahaas markaas waxaad u baahan tahay inaad cid kale la hadasho.

Caawimaadda waxaa kaa xiga wacidda taleefanka

Haddaad doonaysid inaad la hadasho cid kale aadna kala hadasho siyaabaha aad caawimaad ku heli karto, waxaad wici kartaa Adeegga Macluumaadka Khamriga iyo Daroogada (ADIS).

Taas waa adeeg lacag la'aan ah oo qarsoodi ah kaas oo la heli karo 24ka saac maalintii, 7 maalmood asbuucii.
Cid u baahan ma jirto inay ogaato inaad soo wacday oo talo-siin, caawimaad ama taageero codsatay. **Macluumaadkaaga cid kale lama siin doono oo uu ka mid yahay boliisku.**